Dugsiyada Degmada Lambar 1
Magaalada iyo Degmada
Denver Go'aanka Gobolka
Colorado Lambar 5022

MEEL KASTA, Dugsiyada Dadweynaha Denver (DPS) waxaa ka go'an in ay ka shaqeyso oo ay joogteyso barnaamijyo tayo sare in ay helaan ardeyda DPS oo dhan;

MEEL KASTA, DPS waxaa ka go'an inay maalgeliso ardeyda iyo iskuullada si loo hubiyo fursado ah sinnaan gaar ahaaneed in ay helaan ardeyda oo dhan;

MEEL KASTA, Iskuulada haysta ardeyda badan waxa la filayaa in ay ardeydu ka helaan barnaamij ardayda oo dhan u noqda fursado ay la socdaan sinnaan gaar ahaaneed, sida barnaamijka tacliinta, waxqabasho iyo fursadaha iskuulka ka baxsan, barnaamijyo ah waxbarashada luuqadaha badan oo ardeyda ku habboon, maaddooyin badan oo la kala dooran karo, iyo sidoo kale Caawimaadda Ardeyda oo ah dhinac kasta - shucuurta bulshada iyo caafimaadka dhimirka, iyo barnaamijyo ah dhaqancelis;

MEEL KASTA, iskuullada ay si joogto ah ugu yaraadaan ardeyda waa kuwa aan badanaa dhigi karin maaddooyin badan oo la kala dooran karo, oo arrintaasi waxay saameyneysaa waxbarashada luuqadda iyo barnaamijyada TNLI, in ay yaraadaan fursadaha ka baxsan iskuulka/ waxqabadka, oo ardeyduna mararka qaarkood ma helayaan fursado dheeraad ah, dhaqaale la'aan jirta awgeed;

MEEL KASTA, Shaqaalaha DPS iyo guddiga Xoojinta Xaafadaha waxay go'aamiyeen "ardey ku filan oo joogto ah" in ay haystaan dugsiyada hoose oo waa in ay ka badan yihiin 300 oo arday, si iskuulku u sii wadan karo ugu yaraan 2 fasal heer kasta oo fasalkiiba in ay fariisato 25 arday heerarka dugsiyada hoose; iyo in ay shaqaalaha DPS soo gudbiyaan macluumaad dheeraad ah si loogu go'aamiyo heerka la iska rabo ee dugsiyada sare iyadoo lagu xisaabtamayo barnaamijyada yaryar ee beddiilka noqon kara;

MEEL KASTA, marka ay ardeydu ka yaraato heerka la rabo, iskuulkaasna uma suuroobeyso in uu hirgeliyo barnaamijka waxbarashada oo waxaa saameyn ku yeelanaya hoos u dhaca maalgelinta;

MEEL KASTA, qaybo badan oo ka mid ah Denver waxaa ku socda isbeddallo waawayn oo ah tirada dadka, oo natiijaduna waa hoos u dhac weyn in uu ku yimid da'da ardeyda DPS (hoos u dhacuna waa ku-dhowaad 5,000 oo lagu arkay ardeydii dugsiga hoose intii u dhaxeysay 2014 ilaa 2020 oo keliya);

MEEL KASTA, hoos u dhaca tirada ardeyda bilaabeysa iskuullada waxa la saadaalinayo waa in uu hoos u dhacu sii socon doono wakhti badan oo uu saameyn ku yeelan doono dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare ee DPS, oo sidoo kale magaalada iyo guud ahaan gobolka ooo dhan waxaa ka muuqata in ay sii yaraanayaan carruurta dhalaneysa ama taranka dadka, qiimaha iyo dhismaha guryaha dadka badan ayaa kacaya oo dhismaha guryaha halka qoys ayaa sii yaraanaya;

MEEL KASTA, Dugsiyada Dadweynaha Denver waxay ku qiimeyn doonaaan waa codka iskuulka iyo bulshada si xal loogu helo hoos u dhaca tirada ardeyda iyo in laga wada shaqeeyo qorshe wanaagsan loogu adeego ardeyda iyo xaafadaha;

HADDA, SIDAAS DARTEED, XAL HA LA HELO, oo waxa jira waa hoos u dhaca baaxad leh oo ku yimid tirada carruurta da'da iskuulka gaartay, Guddoonka Waxbarashada waxa ay agaasimaan Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Denver iyo shaqaalaha degmada si ay u sameeyaan habraacyo ay wax ku hoggaamiyaan degmadda oo dhan iyo in ay la socdaan dugsiyada ay ardeydu ku sii yaraaneyso;

BAL HADDA IYO XAL KALE, in shaqaalaha DPS loo sheego in ay si toos ah ula shaqeeyaan dadweynaha iskuulka ku xiran, sida shaqaalaha, ardeyda, waalidiinta/ qoysaska/masuulka, deriska iyo kooxaha xaafadaha, iyo dadka u hadla ardeyda DPS;

BAL HADDA IYO XAL KALE, in ay Guddoonka Waxbarashada ka filnayaan maamulka degmada in ay sameeyaan isku-duwid, caawimaad farsamo iyo taakuleyn kale wixii lagama maarmaan u noqanaya bulshadu in ay wax hoggaamiso, waxyaabo la sameynayo oo ay degmadu taageereyso oo ka jawaabaya baahiyaha gaarka ah ee deegaan kasta, iyo in la hubiyo barnaamijyo tayo leh in loo hayo ardeyda, in la isku filnaado dhaqaale ahaan, helidda shaqaalaha, iyo sida loo adeegsanayo dhismeyaasha;

BAL HADDA IYO XAL KALE, in Guddoonka waxbarashada ka filanayaan waxyaabaha lagu taliyey ee ay hogaaminayaan bulshada inay yihiin sinnaan gaar ahaaneed, iyo waxyaabo tayo sare oo lagu sii haysan karo tiro arday joogto ah;

BAL HADDA IYO XAL KALE, in uu Guddoonka waxbarashada si adag ugu sheego iskuullada oo dhan, maamul kasta oo u joogaba, inay ka qeybqaataan wada-hadalkan si loo hubiyo in ay ardeyda DPS helaan barnaamijyo tayo leh oo ay si fiican u dhigtaan iskuullada si buuxda ugu shaqeyn kara barnaamijyada iyo qorsheyaasha iskuulkooda;

BAL HADDA IYO XAL KALE, in ay Guddoonka waxbarashada shuruud ka dhigaan waxyaabo in la tixgelinayo, iyo wixii kale oo isbeddel suurtagal ah, in la fuliyo shuruudaha sharciga ah ee aasaasiga u ah barnaamijyada ELA sida ku xusan Xeerka Oggolaanshaha (oo ay ku jiraan TNLI) iyo waxbarashada gaarka ah, iyo sidoo kale in ay ku jiraan waxyaabo kale oo ah dareenka bulshada.

BAL HADDA IYO XAL KALE, in ay Guddoonka waxbarashada qiimeyn doonaan waxyaabaha ay bulshada hoggaanka u hayso marka la buuxin karo shuruudaha soo socda:

- Waxyaabo badan in la soo bandhigo oo ay dhib iyo dheefba maqlaan Guddoonka Waxbarashada si ay u tixgeliyaan;
- Waxyaabaha la tixgelinayo waxay buuxinayaan baahiyada Degmada ee isku-darka tirada guud ee dugsiyada DPS/fasallada ay wax baraan;

- Waxyaabahaas waxaa ka mid noqon doona in iskuulladu sii wadan karaan diiwaangelin arday ka badan 300 oo arday oo dhigata dugsiyada hoose iyo in heer xad ah loo dejiyo dugsiyada sare;
- Waxyaabahaas waxa ay iskuullada u oggolaan doonaan in ay noqon karaan kuwo dhaqaale ahaan sii jiri kara, oo ah wax la jaanqaadi kara iskuullada kale ee DPS.
- Waxyaabahaas waxa ay soo bandhigi doonaan dhib iyo dheefba qaabeynta soohdimo cusub;
- Waxyaabahaas waxa ay soo bandhigi doonaan fikradaha bulshadu ku aragtay barnaamijyada iskuulka ee lagu kordhin karo waxbarashada iyo natiijooyinka ardeyda.
- Waxyaabahaas waxa ay soo bandhigi doonaan fikradaha ay bulshada aragtay ee ku aaddan dhismaha iskuulka in loo isticmaalo in lagu daro iskuullo kale iyo sidoo kale in dhismaha la banneeyo.

Carrie A. Olson, PhD

Carrie A. Olson, PhD (11-kii Juun, 2021 10:13 MDT)

Angela Cobián (11-kii Juun, 2021 11:34 MDT)

Carrie A. Olson, PhD, Maamule

Xoghayn